

Nawaaxiga nolol-wanaagga iyo cusboonaysiinta adeegyada caafimaadka iyo arrimaha bulshada:

MAXAA ISKA BADDALAYA ADEEGYADA CAAFIMAADKA IYO ARRIMAHA BULSHADA EE DADKA KU NOOL TAMPERE IYO ORIVESI 1.1.2023?

Waxaad ka helaysaa adeegaaga arrimaha iyo bulshada iyo caafimaadka sannadka 2023 bilowgiisa laga bilaabo nawaaxiga nolol-wanaagga ee Pirkanmaa. Mas'uuliyadda la xidhiidha adeegyadu waxaay ka soo wareegaysaa magaalada Tampere waxaayna u wareegaysaa nawaaxiga nolol-wanaagga.

Sababta isbaddalada keenaysa waa cusboonaysiinta adeegyada arrimaha bulshada iyo caafimaadka taas oo keenaysa in nawaaxiga nolo-lwanaagga ee Pirkanmaa ay hadda kaddib u soo wareegaan adeegyada arrimaha bulshada iyo caafimaadka, daryeelka bukaanka ee Pirkanmaa iyo adeegyada badbaadada. Tusaale ahaan:

- xarumaha caafimaadka iyo isbitaalada
- gurmada degdegga ah sida ambulaanska
- daryeelka ilkaha
- adeegyada caafimaadka maskaxda iyo adeegyada arrimaha balwadaha
- daryeelka dugsiyada iyo caafimaadka ardeyda
- xarumaha hooyooyinka iyo dhallaanka
- adeegyada sooshalka
- badbaadada carruurta
- adeegyada naafonimada
- adeegga daryeelka guriga iyo adeegyada dejjinta

Arrimaha anan isbaddalaynin 1.1.2023

Isla goobihii hore ee adeegyada laga heli jiray ayaa ka sii shaqaynaya meelohoodii hore shaqaalihii hore uga shaqaynayay ayaana uga shaqaynaya. Waxaad tusaale ahaan uga daneysan kartaa xarumaha caafimaadka iyo kuwa hooyooyinka ee dhallaanka sidii awalba ad uga daneysan jirtay. Waxaa laga yaabaa in mar dambe nawaaxiga nolol-wanaaggu uu ku sameeyo isbaddalo adeegyadooda iyo goobahooda adeegga.

Ballamaha ad qabsatay iyo booska ad ku leedahay safka daryeelka isbaddal kuma imanayo.

Codsiyada ballamaha iyo macluumaadka bukaanka iyo macaamiishu sidoodii hore ayaay ahaanayaan waxaayna u wareegayaan nawaaxiga nolol-wanaagga.

Waraaqaha adeegga laguugu oggolaaday iyo adeegyada turjumaanku sidii hore ayaay ahaanayaan.

Xarunta badbaadaada iyo dab-damiska ee Pirkanmaa wakhti xaadirkanba waxaay u shaqaysaa qaab qoboleysan adeegyadoodana wax isbaddal ah kuma imanayo.

Wac lambarka caawimaadda heeganka ee 116 117 mar kasta oo ad ka fikirayso inaad isbitaalka heeganka ah tagto. Marka xaaladda gurmada ah lagu jiro 112.

Shaqaalaha lambaradooda taleefanka iyo isbitaalka jaamacadda Tampede ee Tays lambaradooda taleefanku isma baddalayaan.

Arrimaha isbaddalku ku imanayo 1.1.2023

Adeegyada caafimaadka iyo arrimaha bulshada ee Tampere iyo Orivesi ee lambarkooda taleefanku uu ka kaco 03 way isbaddalayaan sannadka bilowgiisa, laakiin taleefanadu si toos ah ayaay ugu dhacayaan lambarka saxda ah illaa 30.4.2023 laga gaadhayo.

Cinwaanada iimayladu way isbaddalayaan:

Cinwaanada iimalayda nawaaxiga nololwanaaggu waa kuwo ku dhamaada @pirha.fi.

Cinwaanada bogga internetku way is baddalayaan:

Macluumaadka ku saabsan adeegyada arrimaha bulshada iyo caafimaadka ee dadka reer Tampere ah kama muuqdaan bogga Tampere.fi ee waxaay ka muuqdaan bogga internetka ee pirha.fi. Adeegyada Tays ayaa xattaa boggaas lagaga warramayaa. Bogga internetka ee xarunta badbaadada iyo dab-damisku wuxuu ahaanayaa pelastustoimi.fi/pirkanmaa.

Shardiyada daryeelka lagu helayo, mushaarada, kharashaadka iyo kharashka macaamiishu wuxuu sii ahaanayaa sidii hore 1.1.2023 laga bilaabo Pirkanmaa oo dhan. Maalmaha mushaarada la bixinayo way is baddali karaan. Macaamiisha qaarkood taakuleymadooda ama kharashaadkooda macaamiilnimo isbaddalo yar ayaa ku imanaya.

Haddii aad ku rabto biilasha kharahsaadka macaamiilnimada bangigaaga internetka waa inaad bangigaaga internetka ku aqbashaa heshiiska cusub ee biilka internetka (e-lasku) oo ad la galayso nawaaxiga nolol-wanaagga.

Haddii ad isticmaalayso nidaamka elegtroonigga ah waa inaad mar labaad buuxisaa oggolaanshaha adeegga elegtrooniga ah.

Macluumaad dheeraad ah waxaad ka helaysaa: pirha.fi

Bogga internetka ee Pirha.fi waxaad sidoo kale ka codsan kartaa talobixin dhanka chat-ka ah.

Cinwaanka nawaaxiga nolol-wanaagga hagitaanka ka jira ee Sote-luuri la dhaho waxaa laga helaa lambarka 03 384 5050 maalmaha shaqada saacadda 8-18. Halkaas waxaad ka heli kartaa macluumaadka tusaale ahaan khuseeya wakhtiyada furnaanshaha goobaha adeegga. Baahida daryeelka lambarka laguma qiimeynayo.